

FAAFINTA

الرسمية



RASMIGA

الجريدة

DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND SOOMAALIYA

لولاية أرض بونت الصومال

Sannadka 1<sup>aad</sup>

Garoowe, 25 Setember 1999

Lam,1R9

FAAFINTA BILWALBA KA SOOBAXDA

جريدة الشهرية

Qaybta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawlad Goboleedka Puntaland

Qiimaha : waa Sh.So- 10.000 lambar walba. **Rukunka** Sannadkii waa Sh.So.-170.000 dalaka gudihisa, dibaddana waa Sh.So.500.000-**Rukunka** la waydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilowdaa 1da janaayo. Qiimaha qoritaanka F.R. halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So. 3.000 Rukunka iyo Qoritaanka waxaa la waydiistaa Qaybta Maamulka Faafinta Rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha berriga ee Wasaaradda Maaliyadda.

TUSMADA

Qaybta Koowaad

Sharci

- ♦ Sharci Lam.7 ee 14/04/1999, "Dib u habaynta Xafiiska Diiwaangelinta Gaadiidka Dhulka (Ufficio P.R.P)" .....Bogga..... 87
- ♦ Sharci Lam.8 ee 14/04/1999, "Khidmadda Dayuuradaha iyo Rakaabka" ..Bogga..... 93
- ♦ Sharci Lam.9 ee 14/04/1999, "ku saabsan Hirgelinta Canshuuraha Dhexe (Canshuuraha Berriga) .....Bogga..... 96
- ♦ Sharci Lam. 10 ee 14/04/1999, "Canshuuraha Furadada.....Bogga..... 103
- ♦ Sharci Lam.11 ee 14/04/1999, "Kuna saabsan Khidmadda ay qaado Wasaaradda Xanaanada Xoolaha Beeraha iyo Deeggaanka.....Bogga..... 116
- ♦ Sharci Lam.12 ee 19/04/1999, "Dakhliga Dawladaha Hoose iyo ku talagalka Miisaaniyadda Degmoyinka Puntland .....Bogga..... 118

Qaybta Labaad

Xeer

Xeer Madaxweyne No. 25 ee April 8, 1999,  
magacaabid Hawl-wadeeno Dawladeed, Bogga.... 128

Qayta Saddexaad



XAFIISKA MADAXWEYNAHA  
OFFICE OF THE PRESIDENT

Tix :

Tariikh :

Ref. :

Date :

Sharci lam.8 ee 14/4/1999

U rogid sharci rasmi ah Xeer-Sharci lam.20 ee 13/03/1999 kuna saabsan  
Khidmadda Dayuuradaha iyo Rakaabka,

MADAXWEYNAHA DAWLADDA PUNTLAND,

MARKUU ARKAY: Axdiga Dawladda Puntland,

ISAGOO TIXGELINAAYA: Ansixinta Golaha Wakiilada ee ku cad  
warqadda summadeedu tahay GW/153/1999 taariikhdeeduna tahay 8/4/1999,

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Xeer-sharci lam.20 kuna saabsanaa Khidmadda Dayuuradaha iyo Rakaabka ee  
Sharcigaan ku lifaaqan waa la ansixiyey, waxaana loo rogay sharci rasmi ah,

Qod. 2aad

Saddex nuqul oo sharcigaan ka mid ah ee uu saxiixay Madaxweynaha iyo  
lifaaqiisa, waxaa loo qaadanayaa asal (originali) waxaana lagu kala kaydinaayaa:  
Xafiiska Garyaqaanka Guud 1 (hal) nuqul; Xafiiska Xoghaynta Golaha  
Wakiilada 1 (hal) nuqul iyo Xafiiska Xoghaynta Madaxtooyada 1 (hal) nuqul,

Qod. 3aad

Sharcigaanu wuxuu dhaqan-gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha  
Dawladda; waxaana lagu soo saarayaa faafinta rasmiga ah ee Dawladda; wuxuu  
Sharcigaan ka mid noqonayaa sharciyada Dalka; Qof kasta waxaa ku waajib ah  
inuu dhawro kuna dhaqmo

Garoowe 14/4/1999

Cabdullaahi Yuusuf Axmed  
Madaxweynaha Dawladda

DAWLADDA PUNTLAND  
EE SOOMAALIYA



PUNTLAND STATE  
OF SOMALIA

Xafiiska madaxweynaha

Ref: SHARCI IR 20 EE 17/03/99 KHID-  
MADHA DIYARADHA & BAKAABKA.

Date: 13 03 99

Madaxweynaha Dawlad-goboleedka Puntland;

Markuu arkay Axdiga dawlad-goboleedka Puntland, qodobka Lr.32  
Markuu arkay Qodobka 5aad & 22aad ee sharci Lr. 08 iyo sharci Lr.14 ee 13/6/1962.  
Markuu arkay sharci Lr. 01 ee 07/02/1965 iyo sharci Lr. 08 ee 21.11.1965 oo  
dhammaantoodba la xiriira maamulada garoomada dayuuradaha & khidamadaha  
garoomada Soomaaliya iyo shirkadaha dayuuradaha ee kala duwan ee ka baxsan  
dawlad-goboleedka Puntland.  
Markuu arkay tala soo jeedintii Wasiirka Wasaaradda Hawlaha guud iyo Gaadiidka

Wuxuu go'aamiyey khidmadaha hoos ku qoran ;

**a) Khidmadda caga-dhigashada (landing fee)**

1. Diyaaradaha culeyskoodu ka yar yahay 20,000 kg. Waxaa laga qaadayaa \$ 90. Halkii marba (per landing)
2. Diyaaradaha culeyskoodu u dhexeeyo 20,000-25,000 kg waxaa laga qaadayaa \$ 150. Halkii marba (per landing)
3. Diyaaradaha culeyskoodu ka badan yahay 25,000 kg waxaa laga qaadayaa \$ 300 Halkii marba (per landing)

**b) Khidmadda adeegyada (service and handling charges)**

1. Dayuuradaha culeyskoodu ka yar yahay 20,000 kg waxaa laga qaadayaa \$ 50
2. Diyaaradaha culeyskoodu u dhexeeyo 20,000-25,000 kg waxaa laga qaadayaa \$ 140
3. Diyaaradaha culeyskoodu ka badan yahay 25,000 kg waxaa laga qaadayaa \$500.

**c) Khidmadda baarkinka, (parking fees)**

1. Diyaarad kasta oo culayskeedu ka hooseeyo 12000 kg waxaa laga qaadayaa 24saacba \$40. Waxaa khidmaddu ka bilaabmaysaa 6da saacadood wixii ka dambeeya, 24ka saacba
2. Diyaaradaha culeyskoodu (maximum take of weight) ka badanyahay 12000 kg waxaa laga qaadayaa \$ 5, (1000 kgba) ee siyaado ah miisaanka hore.